

High Blood Calcium

High blood calcium, also called hypercalcemia, means that there is too much calcium in the blood. Most of the calcium in a person's body is in the bones and teeth. Some calcium in blood helps the body to work right. Too much calcium in the blood affects the nerves, digestive tract, heart and kidneys.

Signs

Some people with high blood calcium have signs, while others do not. Signs of high blood calcium include:

- Muscle weakness
- Poor appetite, weight loss
- Nausea or vomiting
- Stomach pain
- Constipation
- Feeling tired
- Increased urine output
- Confusion, behavior changes or loss of memory
- Loss of interest in work or decreased attention span
- Pain in lower back or sides, often caused by kidney stones
- Bones become fragile and can break

Causes

The most common causes of high blood calcium are:

- Lack of activity or exercise
- Over active gland that controls how much calcium your body needs
- Cancer in the bone or blood
- Renal failure
- Taking large amounts of Vitamins A, D and calcium
- Some medicines

Calcium Dhiig oo Sarreeya

Calcium dhiig oo sarreeya, oo sidoo kalena loo yaqaanno hypercalcemia, macnaheedu waa in uu dhiingga ku jiro calcium fara badan. Inta ugu badan calcium-ka qofka jidhkiisa ku jira wuxuu ku jiraa lafaha iyo ilkaha.

Calcium-ka qaar oo dhiingga ku jira wuxuu jidhka ka caawiyaan inuu si sax u shaqeeyo. Calcium fara badan oo dhiiga ku jira wuxuu saameynayaan xididdada, dheef-shiidka, wadnaha iyo kelyaha.

Calaamadaha

Dadka qaar ee qaba dhiig calcium-kiisu sarreeyo waxay leeyihiin calaamado, iyadoo kuwa kalena aysan lahayn. Calaamadaha dhiingga calcium-kiisu sarreeyo waxaa ka mid ah:

- Daciiftinnimo murqaha ah
- Cunto cunid xumo, caatoobid
- Lalabbo ama matagid
- Calool xanuun
- Calool istaag
- Daal dareemid
- Kaadi korodhta
- Jahawareer, dabci beddel ama wax xusuusan waayid
- Xiisaha shaqada oo qofka ka luma ama feejignaanta oo hoos u dhacda
- Xanuun ka qabta qaybta hoose ee dhabarka ama dhinacyada, badanaa uu keeno dhagaxa kellida
- Lafuhu waxay noqdaan kuwo jilcan oo jabi kara

Sababaha

Sababaha ugu badan ee dhiingga calcium-kiisu sarreeyo waa:

- Hawl la'aan ama jir dhis la'aan
- Qanjidh fir-fircooniidiisu xad dhaafsto kaasoo koontaroola inta calcium ah ee jidhkaagu u baahan yahay
- Kansar lafaha ama dhiingga gala
- Hawl gabidda kelyaha
- Qaadashada xaddiyo fara badan oo Fitamiin A, D iyo calcium ah
- Daawooyinka qaarkood

Your Care

To treat high blood calcium and prevent more loss of calcium from your bones, your doctor may ask you to do one or more of these:

- Drink 3-4 quarts or 3-4 liters of liquids each day.
- Take your medicine as ordered.
- Exercise if you are able.
- Get out of bed, sit in a chair and walk as much as possible. Ask for help if you need it.
- If you are in bed all of the time, move from side to side at least every 2 hours.

Talk to your doctor or nurse if you have any questions or concerns or if your signs get worse.

10/2005. Developed through a partnership of The Ohio State University Medical Center, Mount Carmel Health and OhioHealth, Columbus, Ohio. Available for use as a public service without copyright restrictions at www.healthinfotranslations.com.

Daryeelkaaga

Si loo daaweyyo dhiigga calcium-kiisu sarreeyo loogana hortago calcium ka luma lafahaaga, takhtarkaagu waxaa laga yaabaa inuu ku weydiyo mid ka mid ah ama ka badan waxyabahaan soo socda:

- Cab 3-4 quarts ama 3-4 litir oo dareere ah maalin walba.
- U qaado daawooyinkaaga sidi lagu faray.
- Jir dhis samee haddii aad awooddo.
- Sariirta ka soo deg, kursi ku fadhiiso oo soco inta ugu badan ee aad awooddo. Caawino weydiiso haddii aad u baahan tahay.
- Haddii aad sariirta ku jирто waqtiyada oo dhan, dhinac ka dhaqaaq oo dhinaca kale u dhaqaaq ugu yaraan 2 saacadood ee kastaba mar.

La hadal takhtarkaaga ama kalkalisada haddii aad wax su'aalo ama walaac ah qabtid ama haddii ay calaamadahaagu ka sii daraan.

High Blood Calcium. Somali.

10/2005. Developed through a partnership of The Ohio State University Medical Center, Mount Carmel Health and OhioHealth, Columbus, Ohio. Available for use as a public service without copyright restrictions at www.healthinfotranslations.com.